

Ka hortaga Karoonfayras (COVID-19):

Shuruudaha Guud ee Goobta Shaqada – SOO-KOOBID

Department of Labor & Industries (L&I) waxay u baahan tahay in shaqaaleysiiyayaashu bixiyaan goob shaqo oo badqab iyo caafimaad qaba leh iyo in ay hirgaliyaan amarka Duqa si looga hortago fiditaanka karoonaafayras.

Shuruudaha Guud ee Khasabka ah ee loogu talo galay Shaqaaleysiiyayaasha

Kala Fogaanshaha Bulshada

- Hubi in shaqaaluhu ka fogaadaan ugu yaraan lix feet shaqaalaha kale iyo dadweynaha markay macquul tahay.
- Haddii kala fogaanshaha bulshadu aanu macquul ahayn, isticmaal kala dayr iyo hababka kale ee ka hortaga si aad uga hortagtid gudbinta karoonaafayras.
- Hubi isticmaalka marada daboolka wajiga, maaskarada ama neefsiiyayaasha meesha aanu kala fogaanshaha bulshadu macquul ahayn.

Gamco Dhaqis Joogto ah oo ku Filan

- Sii xarumo gacmo dhaqis joogto ah ama la qaadan karo oo leh biyo diiran oo nadiifa, saabuun, iyo warqadaha suuluga.
- Waxa loo baahan yahay gacmo dhaqista marka la imanaayo shaqada, nusasaacaha, isticmaalida suuliga, ka hor iyo ka dib cunista, cabitaanka ama isticmalka alaabaha tubaakada, iyo ka dib taabashada meelaha sadhaysan.
- Sii gacmo nadiifiyayaal/dhaqayaal, masaxaado, ama warqadaha tuwaalka oo la qaadan karo si loo fududeeyo gacmo dhaqis joogto ah (u dhaxaysa gacmo dhaqista) ka dib marka la taabto qalabka dadka kale.

Nadiifinta Joogta iyo Dheeraad ah

- Samee jadwal guri oo ay ku jiraan nadiifinta joogta ah iyo jeermis dilista.
- Hubi qalab ku filan nadiifinta qotadheer iyo jeermis dilista ka dib kiisaska la shakiyey ee COVID-19.
- Badanaa jeermiska ka dil meelaha la taabto.
- Hubi in shaqaaluhu isticmaalaan golofisyada badbaadinta iyo ilaalinta indhaha/wajiga marka kiimiko lala tacaalayo.
- Hubi in baabuurta shaqada ee la wadaago la nadiifiyey jeermiskana laga dilay wakhti kasta oo rakaab gaar ah isticmaalo gaadhiga iyo si joogto ah haddii qof qudha isticmaalo.
- Ilaali Warqadaha Xogta (SDSs) oo nadiifa goobta shaqada.

Usamee Nidaam Shaqaalaha Xanuusanaya

- Waxa loo baahan yahay in shaqaalaha xanuusanayaa joogaan guriga oo ay is go'doomiyaan haddii ay guriga joogaan.
- Aqoonso oo u dir guriga ama go'doomi shaqaalaha yeesha astaamaha xanuunka COVID-19.
- Uga jooji goobaha si ku meel gaadha ilaa la nadiifiyo lagana dilo jeermiska ka dib warbixinta shaqaalaha looga shakiyey ama laga helay xanuunka COVID-19.

Waxbarashada Shaqaalaha ee Khatarta Goobta Shaqada COVID-19

Luuqada ugu fiican ee ay fahmi karaan shaqaaluhu, hubi in ay ogyihiin:

- Caalamadaha, astaamaha, iyo qodobada khatarta ah ee la xiriira xanuunka COVID-19.
- Sida looga hortago fiditaanka karoonaafayras ee shaqada.

- Sida si waxtarleh loogu maydho gacmaha saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbidhiqsi.
- Muhiimada daboolida qufaca iyo hindhisada, iyo inaan lagu taaban wajiga gacmo aan maydhneyn.

* Kani waa koobistii. Faahfaahin dheeriya, fiir F414-164-000 *Coronavirus (COVID-19) Prevention: General Requirements and Prevention Ideas for Workplaces*.